

Caymisyo La Kala Dooranayo

Medical Assistance (Gargaarka Caafimaadka)

Barnaamijka Medicaid Minnesota wuxuu caymiyaa dad badan oo dakhligoodu yar yahay, gaar ahaan carruurta iyo haweenka uurka leh. Wax lacag ah la iskama qaadayo bil walba. Iskuqorista waxaa la heli karaa sannadka oo dhan.

MinnesotaCare

Wuxuu caymiyaa dadka reer Minnesota ee dakhligoodu hooseeyo oo aan awood u lahayn caymiska xanaanada caafimaad ee la iska bixin karo. Inta ay tahay lacagta caymiska ee bil walba waxay ku salaysan tahay tirada iyo dakhliga qoyska. Iskuqorista waxaa la heli karaa sannadka oo dhan.

Qorsheyaasha Caafimaadka ee la Aqoonsanyahay (Qualified Health Plans)

Qorshayaasha caafimaadka oo ay shirkadaha caymisku ku soo bandhigaan suuqa caymiska. Waxaa la heli karaa gargaar dhaqaale iyada oo ay ku xiran tahay dakhliga guriga, tirada qoyska iyo kharashka caymiska deegaankaaga. Qorshayaasha waa in laga gataa MNsure oo kaliya si loogu qalmo.

Waad iskuqori kartaa ama cusboonay-siisan kartaa qorsheyaasha caafimaadka ee la aqoonsanyahay mudada isqoritaanka furan, taasoo badanaaba noqota dhammaadka dayrta ama horaanka jiilaalka. Haddii nolashaada wax iska beddelaan, sida ilmo kuu dhashay, guur ama shaqadii oo aad ku wayday sababo la xiriira caymis caafimaad, waxaad u qalmi kartaa iskuqoris gaar ah oo ka baxsan muddada isqoritaanka furan.

Wargal ahow



mnsure.org



facebook.com/mnsure



@MNSure



Attention. If you need free help interpreting this document, call 1-855-366-7873.

Digniin. Haddii aad u baahantahay caawimaad lacag-la'aan ah ee tarjumaadda qoraalkan, wac 1-855-366-7873.

Atención. Si desea recibir asistencia gratuita para interpretar este documento, llame al 1-855-366-7873.

MNsure uma takoorto dadka sababo la xariira asalka, midabka, asal qarameed, caqiidada, diinta, jinsiga, da'da, naafonimada, kaalmada bulshada, xaaladda guurka ama jinsi doorashada.

CB-So 082015



**Hel kaalmo
caafimaad
oo la awoodi
karo adigoo u
maraya MNsure**



Adeegga iyo Isku Barbardhiga

MNSure waa goob suuq oo ay dadka reer Minnesota ka adeegan karaan, isku barbardhigi karaan meelaha kale ayna ka dooran karaan kaalmo caymis caafimaad oo baahidooda daboosha.

Dhammaan qorsheyaasha MNSure waxaa ku jira kaalmada muhiimka u ah manfacyada caafimaadka sida isbitaal gelidda, adeegyada degdegga ah, dhalmada iyo daryeelka ilmaha dhashay, daawo qorista, booqashooyinka ka hortagga iyo wacnaanta, caafimaadka dhimirka iyo daryeelka aragga dhallaanka.

Qorsheyaasha MNSure waxaa sidoo kale la socda difaaca macaamiisha. Adiga ma lagu diidi karo kaalmo xaalad caafimaad xumo awgeed oo horey u sii jirtay, lagaagamana qaadi karayo lacagta caymiska oo sareysa taariikhda caafimaadkaaga awgeed. Ma jiraan xaddi doollar sannadle ama inta nolosha ka hartay oo caymis ah.

Hel Caawinaad Dhaqaale

MNSure waa meesha keliya ee aad ugu qalmi kartid caawinaad dhaqaale oo hoos u dhigi karta lacagta ceymiska bishiiba.

Iyadoo ku xiran inta qof ee guriga ku nool iyo dakhliga soo gala, ayaa inta badan dadka reer Minnesota u qalmaan barnaamij caymis dadweyne sida Medical Assistance ama MinnesotaCare, ama qorshe qiime hooseeya ku kacaya ee ay kaa siiso shirkad caymis gaar loo leeyahay.

Iska Ilaali Ganaaxyada Canshuurta

Caymis caafimaad oo aad leedahay ma aha oo kaliya in uu niyadda kuu dejiyo, balse waxaa kaloo uu kaa badbaadiyaa in aad ganaax bixisid markaa xeraynayso canshuur celinta federaalka. Inta ganaaxu yahay waxay ku xiran tahay dakhliga, sannad walbana waa ku kordhaa shaqsiyaadka aan caymishayn iyo qoysaska.

Gargaarka Iskuqorista

Booqo MNSure.org, ereyga furuhuna waa: “assister” (gargaare)

Hageyaal

Shaqaaale tababar ka haysta ururo bulsho oo lagu kalsoonyahay ayaa waxay si fool ka fool ah kaaga caawinayaan arji buuxiinta, iskuqorista iyo dabagalka.

Wakiillada iyo Dillaallada

Xirfadlayaal tababaran oo shati leh ayaa si fool ka fool ah kaaga caawinaya iskuqorista iyo talooyin aad ku dooranaysid qorshaha.

Xarunta Wacitaanka MNSure

1-855-366-7873 (1-855-3-MNSURE).
Takhasusleyaal si buuxda loo tababaray ayaa kaaga jawaabaya su'aalaha aad qabtid.